# Waxa Dadka ku nool Gobolkeena U qabaan Shuruudaha Qalin-jabinta Dugsiga Sare

## Ka socota Oregon's Kitchen Table

Sanadkii 2021, Sharci-dejinta Oregon ayaa ansixisay Sharciga Senate-ka 744. Sharcigu wuxuu ahaa in wax laga ogaado sida shuruudaha qalin-jabinta looga dhigo kuwo sinnaan dheeraad ah u leh dhammaan ardayda ku nool Oregon. Wuxuu Waaxda Waxbarashada ee Oregon ku amray (ODE) in ay dib u eegto shuruudaha qalin-jabinta dugsiga sare ee gobolka. Iyada oo qayb ka ah dib u eegistani, ODE ayaa iskaashi la yeelatay Miiska Jikada ee Oregon 'Oregon's Kitchen Table' si loo helo fikrado ka socda dadka ku nool gobolka oo dhan oo ku saabsan mawduucan.

Waxaan fikradahani la dhiibtay helnay dabayaaqadii 2021 ilaa horraantii 2022. Waxaan rabnay in aanu waxyaabo dheeraad ah ka ogaano sida dadku u arkaan in shuruudaha qalin-jabinta dugsiga sare ay si fiican ugu shaqeyn karaan ardayda mustaqbalka. Waxaanu sidoo kale weydiinay sida ay u arkaan in ardaydu u yeelan karaan taageerada ay u baahan yihiin si ay iskugu diyaariyaan guul ay gaaraan dugsiga sare ka dib. Tani waxay ka dhigan tahay guul in iyada oo aan la eegayn waxa uu yahay dariiqa ay ardaydu doorato dugsiga sare ka dib.

### KU SAABSAN MIISKA JIKADA EE OREGON

Miiska Jikada ee Oregon (OKT) waa qayb ka mid ah Xarunta Is-afgaradka Siyaasadda Qaranka oo ku yaala Jaamacadda Gobolka Portland. Waxaanu dhammaan dadka Oregon siinaa cod ah dhanka go'aan qaadashada dadweynaha. Ururo badan ayaa OKT ka codsaday in ay jawaab celin ka hesho dadweynaha. Waxaanu adeegsanayaa fikradaha laga soo ururiyay dadweynaha, ra'yi ururinta dhanka internet-ka, iyo wada hadalada yar yar si dadka loogu oggolaado in ay fikirkooda la wadaagaan go'aan gaarayaasha.

### SIDA AAN WAX U DHAGEYSANAY

OKT ayaa qabatay kulamo dadweyne, wada hadalo yar yar iyo wareysiyo loogu talagalay mashruucani. Waxaanu ku sameynay telefoon ahaan, Facebook, Zoom ama shakhsi ahaan.

Waxaanu sidoo kale sameynay ra'yi ururin dhanka internet-ka oo ku qoran Arabic, Chinese, Ingiriisi, Af-Ruushka, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese.

Si loo gaaro tani, waxaanu la shaqeynay hoggaamiyayaasha bulshada iyo hawl-wadaagayaasha. Waxay bulshooyinkooda ku soo xireen mashruucani. Qaar ka mid ahi waxay qabteen wada hadalada bulshada oo u gaar ah. Kuwo kale waxay taageereen in dadku buuxiyaan ra'yi ururinta.

## WAXA AAN MAQALNAY

Dadka gobolka oo dhan ayaa wadaagay guud ahaan fikradahani:

- Qiyam la wadaago ee dadka ku nool Oregon badankoodu leeyihiin waa in ay noqdaan kuwo dabacsan. Tani waxaa ka mid ah dabacsanaan ku saabsan shuruudaha ka qalin-jabinta dugsiga sare.

- Waa muhiim in la qiro:
    - In ay jiraan sinnaan la'aan ah ka jirta dhanka natiijooyinka waxbarashada
    - In ay sababaan arrimo badan oo aad ah uga durugsan shuruudaha ka qalin-jabinta dugsiga sare
- Dadku waxay arkaan oo mahadiyaan kala duwanaanshaha awoodaha ardayda iyo qaababka waxbarasho.
- Waa muhiimin ardayda la siiyo taageero dhaqan ahaan ku habboon si ay uga caawiso in buuxiyaan shuruudaha qalin-jabinta.
- Dadku waxay u arkaan in maadooyinka sida xisaabta, wax akhriska, iyo wax qoristu ay muhiim yihiin in la barto. Laakiin waxay sidoo kale rabaan in ay ogaadaan sida Oregon hadda wax uga qabato credit-yada la iskaga baahan yahay ee maadooyinkaasi iyo sida ay u qiimeynayso aqoonta maadooyinkaasi.
- Dad badan ayaa u maleeyay in shuruudaha dhanka xisaabta ee hadda jiraa ay caqabad ku ahaayeen ardayda. Waxay rabaan in ay arkaan shuruudaha dhanka xisaabta ee loogu talagalay qalin-jabintu in ay ka turjumaan waxa ay ardaydu daneynayso. Waxay sidoo kale rabaan in ay arkaan in ay si toos ah oo dhab ah

faa'iido ugu leeyihiin shaqooyinka kulliyadda, iyo waddooyinka kale ee nolosha dugsiga sare ka dib.

- Dadku waxay rabaan in ay waxyaabo dheeraad ah ka ogaadaan haddii nidaamka Oregon ee kala doorashooyinka shahaadada ee badani ay si wanaagsan ugu adeegayso ardayda. Waxay rabaan in ay wax ka ogaadaan tani ardayda naafada ahi.
- Aad ayayna muhiim ugu tahay qoysaska in ay helaan waqti hore helaan macluumaad cad isla markaana ku qoran luqaddo badan oo ku saabsan:
  - Waxa ay yihiin kala doorashooyinka shahaadadu
  - Waxa ay yihiin shuruuduhu
  - Macnaha ay u leeyihiin dugsiga sare ka dib
- Xirfadaha iyo aqoonta dad badani qiimeeyaan inta badan ee loogu talagalay ardayda ka qalin-jabinta dugsiga sare waa aqoonta dhaqaale, fikirka muhiimka ah, iyo madaniga ah. Dadku waxay sidoo kale rabaan in ay arkaan ardayda oo barata wada xiriirka iyo sidoo kale goobta shaqada, xirfadaha bulshada, iyo dadka dhexdooda.
- Waxaa jiray waxyaabo kala duwan oo la kala aaminsanaa oo ku saabsanaa:
  - Haddii qiimeynta sida imtixaannada looga baahan yahay qalin-jabinta
  - Doorka ay tahay gobolku ku yeesho qiimeynta
- Dadka qaarkood ayaa u maleeyay in credit-yadaasi iyo qiimeyntaasi ay si aad ah diiradda u saarayso sidii ardayda loogu diyaarin lahaa kulliyad ama jaamacad. Dad kale ayaan u arkin in aysan diiradda si ku filan loo saarin kulliyada ama jaamacada.

## CIDDA AAN WAX KA MAQALNAY

In ka badan 3,500 oo qof ayaa habab kala duwan dadka kula wadaagay waxa uu fikirkoodu ahaa. 3,114 oo qof ayaa ka soo jawaabay ra'yi ururintii dhanka internet-ka ama warqada. Qiyaastii 350 oo qof ayaa ka soo qayb galay 43 ah wada hadalada bulshada oo kala duwan. Konton qof ayaa ka qayb qaatay wareysiyada.

Waxaan wax ka maqalnay:

- Waalidiin, mas'uuliyiin ama xubno ka tirsan qoyska ee dugsiga sare oo hadda jira ama hore
- Ardayda dugsiga sare oo hadda jira ama hore

- Macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiyada Oregon oo hadda jira ama hore
- Dadka u shaqeeya ururada taageera ardayda dugsiga sare ama iyo dhalinyarada
- Dad ka soo kala jeeda mid kasta oo ka mid ah degaannada 36-ka ah ee Oregon

Inka badan kala bar dadku waxay sheegeen in ay iyaga ama ardaydoodu ka tirsan yihiin mid ama ka badan oo ah kooxahani:

- Xubnaha ka tirsan qabiilka hindida
- LGBTQ2SIA+ (Gabdhaha jecel gabdhaha kale, Ragga jecel ragga kale, Kuwa labbada jinsiba jecel 'bisexual', Qof bedeshay jinsiga 'transgender', Qof Laba Ruux leh '2 Spirit', Qof jinsi isku jira leh 'Intersex, Dareen jinsi lahayn 'Asexual', oo ay dheer yihiin kuwa kale ee aan jeclayn jinsiga ka soo horjeeda 'non-heterosexual' ama jinsiga)
- Bartayaasha ingiriiska
- Dadka qaba naafanimada
- Dadka soo maray ama hadda ku jira hoy la'aan
- Dadka ah muhaajiriin ama qoxooti
- Dadka ah shaqaalaha muhaajiriinta ah ama arday
- Dhallinyarada ku jirta daryeelka ilmo korsiga
- Ardayda beddelatay dugsiyada sare

Waanu aqoonsahay in dadku ay isku gartaan tiro bulshooyin ah. In aysan ku koobnayn oo kaliya hal qayb oo ah sida ay u arkaan dunida.

## GUNAANADKA

Fikradaha dadka oo dheeraad ah ayaa muhiim noqon doona iyada oo ODE iyo gobolku soo bandhigayaan talooyin iyo fikir ku saabsan sameynta isbeddel kasta. Haddii iyo goorta ODE ay isbeddelo ku sameyso kala doorashooyinka shahaadada, waxay noqon doontaa mid aad muhiim u ah in lagu daro codadka ardayda qabta naafanimada iyo qoysaskooda. Waxaanu ku dhiirigelinaynaa ODE in ay sii wado wax ka barashada dugsiyada, macallimiinta, ardayda iyo qoysaska ee ku saabsan waxa ay yihiin taageerada ama ilaha ay u baahan karaan haddii gobolku sameeyo isbeddelo.

Waxaanu ugu talagalnay shaqadani in ay noqoto mid ballaaran oo diiradda saaraysa bulshooyin gaar ah oo ku nool qaybaha kala duwan ee gobolka. Helitaanka aragtida bulshooyinka kale ee aan sida fiican adeega u helin ayaa sidoo kale muhiim noqon doona mustaqbalka. Waxaanu ku dhiirigelinaynaa ODE in ay sii wado ula xiriirista dadka ku nool gobolka siyaabo dhaqan ahaan ku habboon.

<u>Qaar ka mid ah waxyaabo laga soo xigtay oo ka socda dadka aanu wax ka maqalnay:</u>

Waa in ay jirtaa waxbarid dhaqan ahaan wax jawaab u noqonaysa. Ka dhig waxyaabo marka la eego macnaha guud ee dhaqan macno sameynaya.

Fadlan xaqiiji in ay tilmaamo iyo qiimeyn adagi jirto si shahaadooyinka dugsiga sare ee Oregon looga dhigo in ay yeeshaan macnaha wax qiime leh.

Inkasta oo aan ku raacsanahay inta badan shuruudaha hadda jira ee (Ingiriiska, sayniska, taariikhda) mid ka mid ah walwalkayga ugu weyni wuxuu ku xeeran yahay xisaabta. Macallin xisaab ahaan iyo qof ka soo shaqeeyay dugsiyada sare ee Oregon, waxaan ogahay in xisaabtu tahay mid hawl weyn ku ah arday badan. Waxaan sidoo kale u arkaa in xisaabta dugsiga sare oo badan sida loo qabto hadda aysan khuseysin nolosha mustaqbalka, ku xiran tahay hadafyada ardayga. Mawduucyada kale ee xisaabta, sida miisaaniyad dejinta, sameynta wax gadasho weyn (guri, gaari), credit, iyo aqoonta dhaqaale ayaa si aad ah loogu dabaqi karaa ardayda intooda badan marka la eego awoodooda ay ku xalinayaan fansaarta saablayda ‘quadratic functions’ ama arigtida pythagorean ‘Pythagorean theorem’.

Go’aanada macallimiintu waxaa dhici karta in aysan gebi ahaanba ahayn kuwo ujeedo leh, iyada oo imtixaanada loo baahan yahay in ay gacan ka geystaan soo bandhigista waxqabadka ardayga

Waxaan jeclaan lahaa in dadka yar yar (dadkii hore u qalin-jabiyay 10-kii sano ee la dhaafay) ay si firfircoon ugu lug yeeshaan si ay uga warqabaan qorshe dejinta tallaabada xigta…wax kasta oo ay yihiin.

Waxaanu baahanahay in aan dhammaanteen u socono hal jiho. Tani waa mid adag, sababta oo ah waxaa jira kala duwanaansho badan oo gaarsiisan degmo ilaa degmo, dugsi ilaa dugsi, iyo xataa macallin ilaa macallin taasi oo ku saabsan waxay u arkaan in ay muhiim tahay si diiradda loo saaro wax dhigista fasalka dhexdiisa.

Shuruudaha qalin-jabinta dugsiga sare waa in ay ku jiraan xirfado aasaasi ah oo loo baahan yahay si hab guul leh loo gelo qaangaarnimada. Waxay u baahan yihiin in ay ogaadaan sida wax loo qoro, akhriyo, loo higaadiyo iyo in ay yeeshaan maaliyadda shakhsi ahaaneed oo aasaasi ah iyo nadaafadeed si ay iskood u noolaadaan, u helaan una sii haystaan shaqo, u bixiyaan biilashadooda iyaga oo aan deyn galaynin, oo wax ku soo kordhiyaan bulshada.

Waxaan soo dhaweyn lahaa in la i siiyo kala doorashada wax ka duwan shahaadada heerka caadiga ah ee loogu talagalay carruurteena qabta naafanimada. Markii aan ka war helay sannadkiisii saddexaad, waxaa la ii sheegay in aan ka soo dib dhacay in aan beddelo oo ka dhigo shahaado wax laga beddelay maadaama aynaan halkan ka bilaabin sanadkiisii hore. Wuxuu ku dhawaaday in uu ka rajo dhigo waxbarashada gebi ahaanteedba iyada aanu ku qasabnay waxbarashada heerka caadiga ah isaga.